




ILMAHAAGU MA WUXUU SAARAN YAHAY KURSIGA SAXDA AH EE GAARIGA?

ISTICMAALKA XADIDAN



Gadaal u yeeda oo saaran kursiga ilmaha ama gaariga ee la badeli karo



Kursiga gaariga ee horay u jeeda oo wata suuman dhexda ku yaala



Kursiga kabista ah ayadoo la adeegsanaayo suunta dhabta iyo garbaha ee gaariga



Kursiga gaariga ayadoo la adeegsanaayo suunta dhabta iyo garbaha ee gaariga

DA'DA/XAJMIGA

Ilmaha Markaas dhasha ilaa ugu yaraan 2 sano jir

Jira ugu yaraan 2 sano OO uu ka waynaaday kursiga gadaal u jeeda ee gaariga joog ahaan ama miisaan ahaan

Jira ugu yaraan 4 sano OO uu ka waynaaday kursiga horay u jeeda ee gaariga joog ahaan ama miisaan ahaan

Jira ugu yaraan 9 sano ama uu ka koray kursiga kabista ah, IYO ilmuhu uu ku baasi karo Tijaabada 5-da Talaabo ah

Haddii ilmuhu ku jiro wax ka badan hal qayb, geli qaybta difaaca dheeriga ah leh (asagoo kursiga gadaal u jeeda yahay kan ugu difaac badan).

Ilmaha kayar da'da 13 sano waa inay fariistaan kursiga danbe, haddii ay suuragal tahay.

Darawal kasta oo qaada ilmo kayar da'da 18 sano kuna qaada gaari matoor leh, waxaa laga doonayaa inuu ilmaha ku xiro kursiga gaariga ama suunka amaanka.


TIJAABA →
DA 5-TA
TALAABO



ILMAHAAGU MA WUXUU SAARAN YAHAY KURSIGA SAXDA AH EE GAARIGA?


TIJAABADA 5-TA TALAABO AH

Tijaabada 5-ta Talaabo ah waa qaab lagu ogaado marka ilmuhu gaari raaci karo ayadoo aan loo dhigin kursi kaabis ah. Ilmaha ayaa si fudud u raaci kara kursiga gaariga oo leh suunka dhabarka iyo garabka marka ilmuhu samayn karo DHAMMAAN 5-TA talaabo.



1

Ilmaha ayaa gadaal u fariista asagoo dhabarka saara kursiga gaariga




2

Lawyihiisa ayaa ku soo laabmaaya cirifka kursiga gaariga



3

Suunka dhabtu uu si fiican u qabsado sinaha u dhow dusha sare ee bawdyaha, MAAHA CALOOSHA



4

Suunka garbuhu uu si adag ugu meersan yahay dhexda xabadka iyo gabrbaha, MAAHA QOORTA



5

Ilmuhu uu u fariisto si sax ah, asagoo aan soo liicin, dhammaan inta safarku socdo

Isbadellada Sharciga the Minnesota Badqabka Rakaabka Ilmaha ah ayaa dhaqan galay Agoosto 1, 2024 (xeerka gobalka 169.685).

Sharciga cusub ayaa bixinaaya tasmada farsamada ugu wanaagsan ee ku socota daryeeleyaasha kuna aadan kuraasta gaariga, kuraasta kaabista ah iyo suumanka kursiga ee si qaab amaan ah loogu qaado ilmaha.

Drive
SAFE

Work
SAFE

Live
SAFE

MINNESOTA SAFETY COUNCIL.ORG

@MNSAFETYCOUNCIL

ST PAUL, MN · 651-291-9150